FSAU
Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Soomaaliya

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

La soo Saaray Bishii 6aad, 2010 *Gu* 2010

## Warbixin Gooban – Odoroska xaaladda Xilliga

Cimilada
Colaadda Sokeeye
Beeraha
Xoolaha
Suuqyada
Nafaqada

## Qodabada Muhiimka ah

Saadaalinta xalada guud ee sugida cuntada waa fiican tahay inta badan hab nolaleeyada Soomalia taas oo ay sababtay roobabka Gu'ga oo fiicnaa. Roobabkaas oo si wanaagsan uga da'ay dalka intiisa badan ayaa si waxku oolnima ah u hagaajiyay xalada daaqa iyo biyaha ee deeganada xoola dhaqatada iyo xaaladda dalagyad. Guud ahaan, xaladda xoolaha ee dalka way hagaagsan tahay, beerahana laga filayo wax-soo-saar wanaagsan ama dhexdhexaad ah ee deegaanada inta badan soo saara badarka . Hase yeeshee, daadadkii ay keenee roobabkii xooganaa ee dalka ka da'ay iyo fatahaadda wabiyada waxay wax yeeleeyeen hab nolaleedyada diilka wabiyada siiba Jubba halkaas oo beeralay badani ay ku waayeen dalagii taagnaa ee la beeray horaantii Gu'ga. Daadadkaasi waxay kale oo ay gaysteen barakac dad ee shan degmo oo koonfurta Soomaliya ah. Si kastaba ha ahaatee, colaadan dabo dheeraatay ayaa ah sababta ugu weyn ee barakaca dhaliya, taas oo inta badan saameyn ku leh koonfurta iyo bartamaha Soomaliya. Colaada sokeeye waxay uga sii dartay sugnaanta cuntada taas oo sababtay qas ku yimi suuqyada (isku socodka iyo ka adeegsiga suuqyada) iyo geynta ama qaybintii kaalmada bini,aadanimo taas oo saamaynta ugu mudani ku habsatay dadka reer magaalka ah iyo barakacayaasha. Sahamadii nafaqada ee dhawaan la sameeyay waxay muujisay xaalad **aad u xun** iyada oo ay ka sii darayso heerka nafaqa darada deegaanka xoolo dhaqatada ee Hab Nololeedka Caduun ee deegaanada bartamaha halkaas oo hadda laga arkay barakac badan oo ay sababtay colaada sokeeye.


### Qodabada Muhiimka ah iyo Hor u Digidda ee Bilaha 7aad illaa 12aa.

- ***Wax-Soo Saar Dhexdhexaad ah oo Xilliga Gu'ga laga Filayo Gobolada Koonfureed ayaa ka Saari doona Dhibta***

  Rajada wax-soo-saarka beeraha ayaa fiican inta badan koonfurta Soomaliya taas oo ay sababtay roobabkii wanaagsanaa. Guud ahaan wax-soo-saarka masagada iyo gallayda ayaa la filayaa in ay dhexdhexaad noqdaan deegaanno badan. Waxaa taas ka duwan gobalada Jubooyinka, halkaas oo daadadkii bishii 5aad ay baabi'yeen dalagkii gallayda ee taagnaa. Xaaladdan dhibeed waxay aad u wiiqday ama saameysay dadka saboolka ah ee ka midka ah bulshada hab nololeedka diilka wabiga Juba taas oo laga yaabo inay ku jiraan xaalad liidata ee dhinaca sugnaanta cuntada in muddo kooban ah ama laga goosanayo dalagga lagu beerayo Dheshekyada bisha 10aad. Wax–soo-saarka badarka Gu'ga ee gobolka Hiraan waxa kale oo laga filayaa in uu liito, roobabkii ka da'ay deeganada beero-xoola dhaqatada iyo diilka wabiga oo aan fiicnayn awgeed iyo waliba meelo ka mid diilka wabiga fatahaadi ka jirto. Markii la tixgaliyo arrimo kale oo dhibaateeyay gobolka sida yaraanta kaalmada bini,aadanimo, barakaca dhawaan ay sababeen fatahaadda wabigu iyo colaadaha oo keenay wareer habka socodka suuqyada, ayaa la saadaalinayaa in Gargaarka Bini'aadamino ka jiri doono gobolka Hiiran illaa dhammaadka sanadkan. Qiimaha badarka dalka (gallayda iyo masagada) wuxuu muujinayaa in uu kor u kacay inta badan gobolada koonfurta Soomaliya lixdii bilood ee ugu danbaysay iyadoo ah caadi xilligan oo kale. Korodhka qiimaha inta badan gobolada koonfureed ee dalka waxa kale ee uu ka tarjumayaa saameynta ay ku leedahay yaraanta oolitaanka badarka suuqyada taas oo ay sababtay liidashadii wax-soo-saarka xilligii Deyrta 2009/2010 ee gobolada qaarkood (Shabelle, Hiran, Gedo). Koritaanka qiimaha ascaarta suuqa waxa kale oo lug ku leh jaho wareerka ku yimi suuqyada nabadgelyo darro iyo hakadka ku yimi dhuuni qaybinta awgeed ee koonfurta.

- ***Xilli Fiican iyo Astaamo Muujinaya Koboc ee Bartamaha iyo Waqooyiga Dalka.***

  Deegaanada caanka ku ah xoolo dhaqatanimada ee gobolada dhexe waxay ka soo doogsadeen ugu danbayntii abaartii dabo dheeratay ee shantii xilli ee u danbaysay, taas oo ay sabab u ahayd roobabkii da'ay xilligii Jilaalka iyo kuwii Gu'ga oo aad u wanaagsanaa. Waxa kale oo roobab fiican ka da'een hab nololeedka xudunta u ah digirta ee gobolada dhexe. Sidoo kale, gobolada waqooyiga oo ay ku jirto deegaanadii ay abaartu wax yeelaysay ee hab nololeeyada Sool iyo beero xoolo dhaqatada Toghdheer waxay heleen roobab waxku ool ah. Hadaba, ilo biyoodkii dhammi way buuxsameen taas oo keentay in guud ahaan ay joogsadaan biyo dhaamiskii ka jiray deegaanada xoola dhaqatada ee gobolada dhexe iyo qawooyi Soomaaliya. Dhul daaqsimeedkii si fiican ayuu u soo kabtay; xoolihiin way ku soo noqdeen deegaanadoodii.ay ka hayaameen. Daaqa fiicnaaday awgeed, idihii iyo riyihiiba way naxeen,




Xilli Sanadeedka Soomaaliya iyo Dhacdooyinkii Ugu Muhiimsanaa

FSNAU - Somalia
United Nations Somalia, Ngecha Road Campus
Box 1230, Village Market, Nairobi, Kenya
Tel: +254-20-4000500
Cell: +254-722-202146 / 733-616881
Fax: +254-20-4000555
Email: info@fsnau.org
Website: www.fsnau.org

si fiicanna way u dhaleen una dhali doonaan labada bilood ee soo socda. Koboca ama hagaaga xaaladeed ee ka jira deegaanada waxay sasabtay hoos u dhaca ku yimi qiimaha caanaha iyo korodhka xoolaha jirka ama ahminka ah ee loo dhoofiyo dalka Sucuudiga iyo Khaliijkaba. Marka la milicsado xaaladda wanaagsan ee hadda jirta, waxa la filayaa in ay hagaagto xaaladda sugnaanta cuntada ee Waqooyigu. Hase yeeshee, soo kabashada hab nololeedka xoola dhaqatada waxay qaadanaysaa dhawr xilli is xiga oo wanaagsan diiftii abaarta dheeraatay awgeed.

- ***Colaadda Sokeeyee Dabo Dheeraadtay ee Soomaaliya waxay Kordhinaysaa Barakaca iyo Xanibnaashaha Gargaarka Bani'aadanimo***

  Tirada barakacayaashu wali waa sii kordhaysaa ayada oo ay sababtay colaadda ka jirta koonfurta iyo bartamada Soomaaliya. Sida ay qabto war bixintii ugu danbaysay ee gudiga dhaqdhaqaaqa dadweynaha ee ay wadaagaan hay'aduhu (IASC), in ka badan 50,000 oo qof ayaa barakacay labadii bilood ee u danbaysay kaliyah. Inta badan barakacaas waxaa sababay nabad gelyo xumada ka jirta Muqdisho, Bartamaha iyo Hiraan iyo sido kale iska hor imaadyada hadda dhacay gobalka Togdheer(Degmada Buuhoodle) taas oo dhexmartay koox maleeshiyo deegaanka ah iyo ciidamo Xabashi ah. Marka laga yimaado Qatarta xadgudubka xaquuqda bini'aadamka iyo takooridda, in badan oo dadka barakacayaasha ah waxay wajahaayaan sugnaan la'aan cunno, hoyi xumo iyo la'aanta adeega aasaasiga ah. Nasiib darro, waxaa jirta dheelitir la'aan tirada sareysa ee barakacayaasha koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya kuwaas oo aan heleyn wax gargaar ah colaadda sokeeye awgeed ee ka jirta deegaanadaas. Tii oo la soo xiganayoHay'adda Isku Duwidda Arrimaha Bani'aadanimo (OCHA), joogitaanka shaqaalaha caalimiga ah ee gobolada dhexe iyo koonfureed waxay tilmaantay waxoogaa korodh ah laga soo bilaabo bishii 2aad, laakiin tiradoodu aad ayay uga hoosaysaa intii sannad ka hor ay ahayd.


- ***Hoos u Dhaca Kharashka ugu Yar- ee Baahida Aasaasiga waxay Kobcinaysaa Dhuuni Helista ee Deegaanada Magaalooyinka ee Bartamaha iyo Waqooyiga Soomaaliya***

  Labadii bilood ee u dambeeyay qarashka ugu yare ee baahida aasaasiga waxay muujinaysaa hoos u dhacay ee deegaanada ee badhtamaha iyo waqooyiga ee isticmaala Shillin Soomaliga, halka ayna wax isbedel ahi ka dhicin koonfurta iyo deegaanada laga isticmaalo Shilinka Soomaaliland. Hoos u dhacan waxa u sabab ah waxyar hoos u dhaca qiimaha masagada, sonkorta iyo caanaha ee bilaha la soo xusay. Kharashka ugu sareeya ee baahida aasaasiga ee bishii 5aad waxa laga diiwaan geliyay deegaanada laga isticmaalo Shilinka Soomaaliga ee gobolada waqooyiga, halka ka ugu hooseeya lagu sheegay koonfurta taas oo ay keentay kala gedisnaanta qiimaha masagda oo ah quudka inta badan la istimaalo. Hoos u dhaca kharashka ugu yar ee baahida aasaasiga ee deegaanada isticmaala Shilin Soomaaliga waxay kobcisay dhuuni helista dadka magaalooyinka oo inta badan ku tiirsan iibsiga cunnada. Hasa yeeshee, dakhli helista dadka saboolka ah ee magaalooyinka ee koonfurta and badhtamaha Soomaaliya waxa carqalad ku ah colaadaha daba dheeraaday kuwaas oo yareeyay fursadaha hab nololeedka sida jaha wareerka ku dhacay dhaqdhaqaaq ganacsiga iyo hawlaha suuqyada.

# SECTOR HIGHLIGHTS


## CIMILADA

**Khariiradda 1: Isku Darka Qiyaasta Roobka (mm) ee Bilaha Maarso – Maajo**




Source: National Oceanic and Atmospheric Administration (NOAA)

**Khariiradda 2: Hal Beegga Cagaarnimada Dhirta (NDVI) ee Tobanka Hore ee Bisha 6aad.**




Source: National Oceanic and Atmospheric Administration (NOAA)

***Roobka da'ay Xiliga Gu,ga***

Roobakii Gu.ga 2010 waxay biloowdeen horaantii April, oo ay ka horeeyeen roobab aan caadi aheyn ee da'ay dhammadkii xiliga jilaalka (Feebaraayo-Maarso). Roobabka Guga waxay ku kala duwanayeen laxaadka, mudada da'itaanka iyo baaxada meelo badan oo kamid ah dalka, iyadoo si caadi ah iyo si ka wanagsanba xilligu uga da'ay (khariidada 1).

Dhanka Waqooyiga, waxaa laga helay roobab badan oo baahsan inta badan gobalada Awdal, waqooyi galbeed iyo Togdheer, halka ay roobab Qayaas ahi ka da,een Dooxada Nugaal, Sanaag iyo dhanka galbeed ee gobalka Sool. Sido kale, qaybo ka mid Golis iyo Hawdka Togdheer ayaa helay roobab dhexdhaxaad ah. Roobab xoog leh ayaa waxay sidoo kale ka da, een magaalooyinka Caluula, Qardho iyo Baargaal ee gobalka Bari intii lagu jiray bartamaha May. Hasee yeeshee, roobabku ismahaysan oo goosgoos ayay ahaayeen meelo ka mid ah Hawdka Togdheer, xoolodhaqatada Gagaab iyo dhulka xeebta ee deexda. Marka la barbar dhigo roobkii da,ay Maarso iyo May, waxay ka sareeyaan boqolkiiba 80 ilaa 300 celceliska waqtiga dheer, inta badan waqooyiga marka laga reebo dhulka deexda ah iyo qaybo ka mid ah Sanaag.

Inta badan gobalada Dhexe, roobkii ka da,ay boqolkiiba 80 iyo 180 ayay ka yihiin heerka caadiga. Sidoo kale , Roobab xoog leh oo is haystaa ayaa ka da'ay Mudug (Galkcayo, Goldogab) iyo Galgaduud (dagmooyinka Dhuuso mareeb, Cabud waaq iyo Cadaado). Marka la kala qeybiyo habnolaleedyada, waxaa la ogaadey in qeybaha uga badan ee xoolaleeyda cadduun ee Hobyo ay heleen roobab qayaas ah, halka qeybo ka mid ah dhulka xeebta ee deexda iyo meelo ka mid ah dhulka digirtu ka baxdo ay heleen roobab ka yar inta caadiga. Dhulka intiisa soo hartey waxay heleen roobab caadi ah iyo wax ka sarreeya.

Xagga Koonfurta roobab fiican baa ka da.ay inta badan Gobalada Bay, Shabelle iyo Gedo, qaybo ka mid ah gobolada Bakool iyo Jubba, sidoo kale inta badan ee habnolaleedka xooladhaqatada hawdka ee gobalka Hiraan. Dhulka roobabkiisu filiqsanaa ee liitey waxaa ka mid ah Beero-xoola iskudhaqatada dagmooyinka Sakow iyo Bu, aale (Jubbada dhexe), sidoo kale dhulka deexda xeebta ee dagmada Cadale (Shabelleda dhexe). Roobkii Gu,ga ee da'ay April - May , boqolkiiba 120 ilaa in ka badan 300 ayuu ka ahaa celceliska waqtiga dheer.

Roobabkii fiicanaa oo da,ay awgeed, xaalladaha dooggu waxay ahaayeen caadi iyo si ka wanaagsan Soomaliya inteeda abadan xiliga sanadkan, sida lagu qayaasey halbeegga tusaha kala duwanaanshaha doogga (NDVI) ee tobankii Bari ee u horayey bisha Juun (Khariidada 2).

## XOGTA FATAHAADDA

Roobabkii xooganaa ee ka da'ay dooxooyinka Shabeelle iyo Jubba ee Soomaaliya iyo taagagga Itoobiya, wabiyada ayaa ku fatahay qaybo kamid ah koonfurta waddanka. Fatahaado xun ayaa ka dhacay degmooyinka Beletweyne, Jalalaqsi iyo Buuloburte (Hiiraan), Kurtunwaarrey (Shabeelada Hoose), Jawhar (Shabeelada Dhexe)Buale, sakow iyo Jilib (Jubbada Dhexe). Gobolka Jubbada Hoose, khaasatan degmada Jamaame, fataahaado ayaa ku fadhiisatay dhul beereed ballaran. Xagga Waqooyi-galbeed, roobab lixaad leh oo ka da'ay toddobaadkii ugu horreyay bishii 3aad ayaa sbabay fatahaado ka dhacay gobollada Waqooyi galbeed iyo awdal. Waqooyi-bari, roobab wata duufannadii kulaalaha oo ka curtay Bad-weynta Hindia ayaa sababy fatahaado, khaasatan degmooyinka Caluula iyo Iskushuban (Magaalada Baargaal) bishii 5aad.



*Galley Biyuhu ku Fataheen. Beletraxmo, Jamaame, Juubada Hoose, Maajo 2010.*

Muhiimad Gaar ah ee Fatahaadda Gu 2010. Xilligan Gu'ga waxa da'ay roobab mahiigaan ah oo sababay in ay wabiyada Juba iyo Shabeelle fatahaan iyo waliba in sababeen daadad in ay ka dhacaan meelo kale oo wadanka ka mid. Fatahaadaha ka dhacay koonfurtay waxay sababeen barakac muddo kooban ah iyo khasaare soo gaadhay beeraha iyo hanta kaleba. Dhinaca Waqooyiga, daadadkii ka dhacay sidaa u may buurayn waxayse sababeen barakac ka dashay Caluula (35 guri oo dumey) and dhimasho xoolaad deegaanka Baargaal ee degmada Iskushuban.

Roobabka Gu 2010 si wanaagsan ayay u bilawdeen wadanka oo idil. Waxa roobabka Gu ka soo horeey roobab deeq Allah oo da'ay dabaqaayadii bishii 2aad ama horaantii bishii 3aad. Roobab mahiigaan ah oo da'ay horaantii bishii 3aad waxay sababeen daadad meelo ka mid ah waqooyi gabeel (Soomaaliland), khaasatan degmada Gabiley ee gobolka W. Galbeed, daadadkaasi oo gayeysiiyey gobolka dimasho dad iyo xoolo iyo khasaare kale oo ay ka mid yihiin burbur ku yimaadda waraha iyo qaab dhismeedka dhuumaha biyo qaybinta. Roobabku way ka xoogeysteen buuraha Ethiopia iyo godanada wabiyada Juba iyo Shabeelle ee Soomaaliya illaa aakhirkii bishii 4aad ama badhtamahii bishii 5aad. Qar jabinta wabiyada aakhirkii bishii 5aad waxay sababtay in ay saameyn ku yeeshaan dhammaan gobolada kulaala dooxooyinka wabiyada sida Hiiraan (Beletweyn, Buula Burte, Jalalqsi), Shabeelaha Dhexe (Jawhar), Shabeelaha Hoose (Kurtunwaarey), Jubada Dhexe (Saakaw, Buuaale, Jilib) iyo Jubada Hoose (Jamaame). Isla wakhtigan, roobab dabeyla wata ayaa ku dhuftay gobolka Bari sababayna daadad ka dhaca degmooyinka Caluula, Iskushuban iyo Qardho.

Saameynta daadadka iyo fatahaadda wabiyada waxa ka mid ah barakac iyo burbur beero iyo hanta, khaasatan diilka wabiga Juba. Hase yeeshee, guud ahaan, baaxadda fatahaadaha dalka aad ayay uga dhib yar tahay fatahaadii sannadkii 2006 oo sababtay barakac dhan 455,000 qof iyo baaba'a dhammaan dalagyadii ku yiilay deegaanada diilka wabiyada. Barakaca fatahaadu sabatay xilligan Gu waxa lagu qiyaasay 11,000 qoys ama 66,000 qof ee shanta degmo: Beletweyn, Jalalqsi, Buula Burte, Kurtunwaarey iyo Jamaame. Hase yeeshee, barakacu waxa uu ku koobnaa oo kaliya goobahooda taas oo loo barakacay dhulka taaga ah. Haddii roobabka xoogani ka sii socdaan dhulka biyo rogga ah ee wabiyada Juba iyo Shabeelle, fatahaado kale waa la huraan.

Kooxda Xogta Fatahaadda (Hay'adaha: FSNAU, SWALIM iyo FEWS.NET) oo la curiyay bishii 10 2009 ayaa la socday fatahaadda xilligan Gu waxayna caddeeyeen warbixinada fatahaadda ee Soomaaliya. Kooxdu waxay si joogta xaaladda iyo saameynta fataadaha ugu keydinaysay shabakadda xogta fatahaadda ee hay'adda SWALIM: http://www.faoswalim.org/subsites/frrmis/index.php. Xogtii ugu dambeysay ee saameynta fatahaadda ee ay qortay Kooxda Xogta Fatahaadda waxa lagu soo koobay shaxda sare ku xusan.

Liidashada joogtada ah ee maamul xumida wabiyada, daryeel la'aanta agabka fatahaad celinta, iyo la'aanta isduwidda ee heer deegaan, gobol iyo qaran waxay horseeday in aan la xakameyn Karin fatahaadda. Sii socoshada dhigaalka ciidda caloosha wabiga, burburka gabiyada wabiga, deegameynta banaanadii ay biyuhu ku fatihi lahaayeen iyo isticmaal xumida kaliyada, waxay kordhin kartaa tirada dadka ku waxyeelooba fatahaad yar oo timaadda xilliyada soo socda. Inkasta oo qaab dhismeedka iyo caloosha biyo qabatinada wabiga ay adkeysay saadaalinta iyo hor u digidda fataahadda wax adag, waxa muhiim ah in wakhti munaasib ah oo sugan la hawl geliyo gurmadka lana sheego fatahaadaha waayo aragnimona laga kasbado xilligan Gu 2010.

| Gobol/Deegaan | Degmo | Tirada qoysaska reer magaalka ah ee barakacay | Tirada qoysaska reer miyiga ah ee barakacay | Saameynta fatahaadda |
|---|---|---|---|---|
| Diisha wabiga gobolka Hiiraan | Beletweyne | 6,000 | 2,910 | Fatahaad ku dhacday dhuul baryo ah iyo dhul beeran (*qiyaastii 2,000-2,500ha oo galley, digir, sisin iyo khudaa* ) |
| | Jalalaqsi | 0 | 1,500 | Fatahaad ku dhacaday dhuul duur/ baryo ah iyo dhul beeran (*qiyaastii 1,000 – 1,500 ha* oo galley, digir, sisin iyo khudaar) |
| | Buulo-Burte | 0 | 350 | Fatahaad ku dhacaday dhuul duur/ baryo ah iyo dhul beeran (*qiyaastii* 100-150ha *ha* oo galley, digir, sisin, masaggo iyo khudaar)) |
| Diisha wabiga gobolka Shabeelaha Dhexe | Jowhar/ Mahadaay | 0 | 0.0 | Fatahaad ku dhacaday dhuul duur/ baryo ah iyo dhul beeran (*qiyaastii 3440 ha* oo galley, digir, sisin) |
| Diisha wabiga gobolka Shabeelaha Hoose | Kurtunwaarey | 0 | 250 | Fatahaad ku dhacaday dhuul duur/ baryo ah iyo dhul beeran (*qiyaastii 200-300ha* oo galley, digir, sisin) |
| Diisha wabiga gobolka Jubada Dhexe | Jilib | 0 | 0 | Fatahaad ku dhacaday dhuul duur/ baryo ah iyo dhul beeran (*7,100 ha*) |
| | Buuaale | 0 | 0 | Fatahaad ku dhacaday dhuul duur/ baryo ah iyo dhul beeran (*5,700ha*) |
| | Sakow/ Salagle | 0 | 0 | Fatahaad ku dhacaday dhuul duur/ baryo ah iyo dhul beeran (*6,300ha*) |
| Diisha wabiga gobolka Jubada Hoose | Jammame | 0 | 100 | Fatahaad ku dhacaday dhuul duur/ baryo ah iyo dhul beeran (*10,000 – 15,000ha*) |
| Bari | Caluula/ Bargal | 0 | 0 | Dhimasho xoolaad iyo burbur hantiyeed |
| | Qardho | 0 | 0 | Burbur hantiyeed |
| Wadar | | 6,000 qoys | 5,110 qoys | 34,000- 40,000ha |

### NUGLAANSHAHA BULSHADA DIISHA WABIGA JUBBA

Fatahaadii waxay saameyn baaxad leh ku yeelatay xaalladda sugnaanta cuntada ee bulshada diisha wabiga Juba (gaar ahaan Jamaame iyo Jilib), kuwaasi ay ka baabaday dalagyadii la beeray horaantii Gu. Waxa kale oo xaaladda uga sii daray bulshada oo saddex ama laba jibaartay dacabkii dhulka si ay uga faa'ideystaan roobabkii da'ay bilihii 2aad iyo 3aad ee 2010. Kharashka ku baxay tacabka kordhay waxa lagu daboolay iibka saa'idka ah ee badarkii kaydka ahaa ee xilligii Deyrta 2009/2010 taasi oo aad u yareysay kaydka gallayda ee heer qoys. Filashadii xabuuqa gallaydii hore loo beeray waxa baabi'iyay fataahaadii. Tani waxa kale oo saameysay tacab goosigii iyo shaqo heliddii ee heer qoys oo ay inta badan ku tiirsanaayeen si ay dakhli uga heli jireen inta ay dalagyadu taagan yihiin.

U adkeysiga dhibaatooyinka ee bulshada ay fatahaaduhu saameeyeen wey nugusha ahay taas oo ay sababtay kaalmadii laga heli jiray qoysaska ladan oo iyagana dadaadadku saameeyeen. Waxa kale oo jira bulshada ku nool diisha wabiga oo la faquuqo, inta badan aan cid mug lihi ugu maqnayn dalalka dibadda. Iyadoo la dix gelinayo saameynta dhibaatooyinak iyo nuglaanshaha qoysaska saboolka ah ee dissha wabiga, waxa laga yaabaa in ay muddo kooban ku jiri doonaan liidasha helintaanga dhuuniga ama cunnada. Hase yeeshee, dhibtu way sahlanaan doontaa marka tacab galka dhulka deshekyadu bilawdo, kaluumeysiga deshekyad iyo goonta dalagyada dhici doona bilaha 9aad iyo 10aad.

## COLAADAHA SOKEEYE

Deganaan la'aanta siyaasadeed ee daba dheeraatey iyo rabshadaha socda ayaa waxyeeleeyn ku haya nolosha iyo habnololeedka dadka Soomaaliya.Iskahorimaadyada ka socda Muqdisho,Hiiraan iyo gobollada dhexe, ayaa isdabajoog noqdey dhowrka bilood ee la soo dhaafey. Bisha May, iskahorimaadyo cusub ee ka dhaxeeya dhinacyo iska soo horjeeda ayaa ka dhacay meelo kale oo koofurta ka mid ah.

Gobollada waqooyiga, ee ka yar xasiloon, ayaa iskudhac cusub waxuu ka dhacey degmada Owdweyne ee gobolka Togdheer dabayaaqadii bisha May., halka xiisad siyaasadeed ay ka soo ifbaxdey degmada Laascaanood ee Gobolka Sool. Dhacdooyinkan, oo aalaaba dhaliyey dhimasho bani'aadam, burbur hanti, barakac, islamarkaana carqaladeeyey dhaqdhaqaaqa ganacsiga iyo habsami u socodka suuqyada.


Caasimadda Muqdusho iyo gobalada Hiraan iyo Galguduud, ayaa ah meelaha ugu kulkulul, ee rabshadaha iyo iskahorimaadyadu ay si joogta ah uga dhaceen. Iskudhaca ka socda Muqdisho ee carqaladeeyey dhadhaqaaqa suuqa iyo waxkala gadashada, gaar ahaana waxyeello ugeysta qoysaska danyarta, oo badanaaba ku tiirsan dakhlli maalmeed ay ka helaan xoogsiga iyo gedis yar yar(ganacsi yar yar) si ay ugu noolaadaan. Sidaa darted, tiro balaaran oo danyarta magaalada , ooy la socdaan qoysas hantiilayaal ahi, ayaa raadinaya meelo yar nabad dhaama ee magaalada dhexdeeda ama meel ka baxsan. Sidoo kale xiisad ayaa ku fideysa meelo ka mid ah koonfurta, ee ay kooxaha hubeysani ay sida tooska iskaga soo horjeedaan, gaar ahaan gobollada Jubbooyinka, Gedo iyo Bakool. Iskahorimaadyada siyaasadeed waxaa wehliya, iskudhac jlibeed (beeleed) oo dhacay bisha May, kaas oo la xiriira lahaanshaha waro biyood bulshadeed, meel u dhexeeysa degmooyinka baydhabo iyo qansaxdheere (Gobolka Bay). Iskudhacyadu waxay galaafteen naffaf badan, laakiin waxaa la sheegey in dib loo xalliyey arrinkaa.

Rabshadaha iskudhacyada ee ka socda gobollada dhexe waxay barakiciyeen dadweynaha magaalada, carqaladeeyeyna ganacsiga iyo shaqooyinka samafallada. Horraantii bishan, iskudhacyo cusub ayaa ka dhacay duleedka bariga magaalada Beledweyne ee Gobolka Hiiraan, kaas oo kalifey in dad badan oo ay fatahaadyadu barakiciyeen ku khasbey inay dib ugu laabtaan guryahooda biyeeysan oo khtar ku ah noloshooda.

Iskudhacyadii ugu dambeeyey, waxay dhexmareen xoogagga Itoobiyaanka iyo maleeshiya deegaameedka Buuhoodlle ee gobolka Togdheer, taasoo keentey in Itoobiyaanku xiraan Xuduuda, ayna diidaan in gawaarida ganacsiga soomaalidu galaan xuduuda itoobiyaanka. Waxaa la sheegey, in qoysas lagu qayaasey 1,800 ay barakiciyeen iskudhacaasi (warbaxin sitimaanlaha heya'dda bania'aadanimada OCHA, 28 May_04 June 2010).


Heya'adda lasocoshada dhaqdhaqaaqa dadka(june 4,2010)waxay ku qiyaastey in ku dhow 53,000 oo ruux inay ka barakaceen dalkoo dhan, tan iyo April 2010, iyadoo 17,000 ay barakaceen April,iyo qiyaastii 35,900 May 2010.in ku dhow boqolkiiba sideetan iyo todobo(46,000 ruux) barakaca waxaa keeney nabadgelya la'aanta ku sii fedeysa Muqdisho, Gobollada dhexe, Hiiraan iyo qeybo kaloo dalka. In ku dhow 35,000 marka loo eego tirade guud oo barakacdey, waxay ka yimaadeen Muqdisho ama u barakaceen gudaheeda (Jaantuska 1).

**Jaantuska 1: Dhaqdhaqaaqa Barakaca Dadka ee Soomaaliya ee Bishii Abriile illaaa 4ta Maajo**




Source: Modified from IASC PMT Update, June 4th 2010

**Jaantuska 2: Joogitaanka Hay'adaha Qaramada Midoobay iyo Kuwa Caalamiga ah ee Soomaaliya, Bisha Abriile**




Ficilada burcad badeeda ee ku wajahan maraakiibta isaga gooshta biyaha caalamiga ayaa weli soconayey dhowrkii bilood oo la soo dhaafey.Hasee yeeshee, lama sheegin weerar bartilmaameedsanaya maraakiibta ganacsiga iyo kaalmada bani'aadanimo u sidda Soomaaliya, ka dib weerarkii lamafilaanka ahaa ee noocaas oo dhacay March 2010(FSNAU warbaxinta afarbiloodlaha, April 2010). Sida lasheegaayey isku daygii lagu afduubaayey 40 markab tan iyo January 2010, 13 ka mid ah ayaa lagu guuleystey (Xogwarranka OCHA, April 2010).

Madaama ay xalada Nabadgelyo ee Somaaliya, ay aad u xuntahay in badan oo wadanka ka mid ah, waxaa sii baahey xayiraadda dhaqdhaqaaqa gargaarka bani'aadanimada, taasoo weli ah walaac khatar ah oo ka jira inta badan koonfurta iyo gobollada dhexe ee Soomaaliya. Ayadoo la xiganayo xogta OCHA (April 2010), tirida guud ee shaqaalaha caalimiga UN-ta iyo shaqaalaha NGO- yada caalamiga ayaa korortey, oo gaartey 205 qofood (196 in February 2010). Haatan, shaqaalahaas intiisa badan waxay joogaan waqooyiga Soomaliya oo yara dagan. Inkastoo, shaqaalaha caalamiga ee jooga koonfurta iyo Gobollada dhexe ay si tartiib ah u kordhaayeen tan iyo Feebaraayo, weli tirada shaqaaluhu aad bay uga hooseeysaa tan sanadka la soo dhaafey (Jantuska 2).

## BEERAHA

### *Xaalladda Dalagyada iyo Tacabka*

Xilligan Gu'ga waxa lagu tilmaansaday korodhka dhul beereedka taas oo ay sababtaydhawr arrimahood sida roobka oo horey u biloowday; korodhka qiimaha badarka, barakacayaasha oo tacbaday beero iyo yaraansha qaybinta dhuunigii kaalmada ahaa.. Roobabka fiican ee ka da'ay qaybo badan oo koonfurta ah ayaa hagaajiyayna xaaladda bixitaanga dalaga. Dalagyad hadda taagani waa kale heer ama da': falka/haramaha illaa heer xabuuq/xasiid taas oo ku xidhan wakhtiga la abuuray ama la shiniyeeyay. Xabuuqa ama xasiidda waxa la filayaa dabaqaayada bisha 5aad ama horaanta bisha 6aad, taas oo la goosan doono inta badan bisha 7aad. Sii socoshada roobabka illa bisha 6aad aad ayaa loogu baahan yahay korintaan dalagyada marka dhalaan ama ubax soo baxshaan. Hase yeeshee, guud ahaan, hadda wax-soo-saarka beeraha xilligan Gu'ga 2010 wrajadoodu way fiican tahay.



*Galley Wanaagsan oo Ubaxaysay. Kurtunwaarey, Shabeelaha Hoose, Maajo 2010*

Deegaanno ka mid ah gobolada Bay iyo Gedo, soo bixidda iyo taabo galka dalagyada waxa wax u dhimay jiriqaa iyo kabojaa, cimiladda wanaagsan awgeed. Taa waxa dheer, waxyeelooyin yaryar oo ay geysteen cayayaan (aboor, dhuunqabad iyo dixiriga boori) aya la soo wariyey gobolada Shabeellooyinka, Jubooyinka, gedo, Baay, Waqooyi Galbeed iyo dhulka digirta lagu tacabo ee gobolada dhexe. Hase yeeshee, warbixinnadii hor dhaca ahaa ee ka yimi gobolada waxay tibaaxayaan in wax-soo-saarka masagadu wanaagsan tahay ee degmooyinka laga soo saaro masagada ee Baay, Bakool, Gedo, Shabeelooyinka iyo Jubooyinka. Sidoo kale, wax-soo-saarka gallayda ee gobolada Shabeelooyin iyo Gedo lagu qiyaasay dhexdhexaad. Haddaba, wax-soo-saarka gobolada Jubooyinka iyo Hiiraan waxa laga yaabaa in uu ka hooseeyo inta dhexdhexaadka ah sababtooy ah fatahaaddii wabiga oo aad u waxyeeleeyay dalagyadii taagnaa iyo roobkoo ku yaraa deegaanad diisha wabiga iyo beero xoola dhaqatada ee gobolka Hiiraan. Dalagyadii ay daadadku waxyeeleeyeen heerar kala duwan ayay marayeen sida falka/harameynta illaa heerka xabuuqa/xasiida. Inkasta oo saameynta ay fatahaadu geysteen aan si buuxda loo sahamin, haddana waxa la qiyaasay baaxadda waxyeelada sida: 15,000 – 20,000ha gobolka Jubada Dhexe, 10,000-15,000ha Jubada Hoose (Jamaame), 3,000-4,000ha Hiiran, 3,000-4,000ha Shabeelaha Dhexe iyo 200-300ha Shabeelaha Hoose. In muddo gooban ah, saameynta fatahaadaha ka dhacay Dooxooyinka Juba iyo Shabeelle waxa kabi doona fursadaha kaluumeysiga ee Dheshekyada, and dalagyada lagu beerayo marka ay biyuhu noqdaan. Sida warbixnta laga helayo, biyo fatahaaddu waxay ku noqonayaan wabiyada, xilligii Xagaayaduna way ka bilaabantay gobolada Shabeelaha, deegaanka gubanka ee Jubooyinka iyo qaybo ka mid ah Baay taas oo wanaajisay dalagyadii taagnaa.



*Galley Daad Waxyeeleeyay. Birbiriso, Saakow, Juubada Dhexe, Maajo 2010*



*Galley Daad Waxyeeleeyay. Fagaan, Jamaame, Juubada Hoose, Maajo 2010*

Korintaanka iyo bixitaanga dalagyad deegaanad Awdal, gobolada Togdheer iyo W. Galbeed ee gobolada Waqooyiga way wanaagsan yihiin roobabka wanaagsan ee da'ay. Xabuuqa ama xasiidda waxa la filayaa dabaqaayada bisha 5aad ama horaanta bisha 6aad, taas oo la goosan doono inta badan bisha 7aad. Roobabka wanaagsan ee da'ay awgee, beeraleydu waxa kale oo ay beerayaan masago (hadhuudh), inta badan loo isticmaalo quud iyo qaran/balba, masagadan waxa la goosan doonaa bilaha 10aad iyo 11aad.


### ***Qiimaha Badarka Dalka iyo Awood Iibsiga***

Qiimaha gallayda iyo masagada waxay muujinayaan xaalada isku jir ah laga soo bilaabo bisha 12 ee 2009. Qiima ha masagada ayaa kor u kacay15-40% inta badan suuqyada xoolo beeralay dhaqatada koonfureed, marka laga reebo gobolka Baay oo uu hoos u dhacay 31% sababta oo ah wax-soo-saarkii fiicanaa ee Deyrtii tagtay (Jaantuska 3). Sidoo kale, qiimaha gallayda ayaa kor u kacay 15-68% inta badan suuqyada koonfurta oo Buuaale (68%) iyo Afmadow (65%) muujinayaa qiima korodhka ugu sareeya (Jaantuska 4). Marka loo barbar dhigo bishii 5aad sanadkii hore, qiima korodhka badarka dalka waxa laga diiwaan galiyey gobolada dhexe (masago 40%), shabeelooyinka (galley 35%) iyo deegaanada lagu tacabo masagada (17%). Qiima korodhka badarka waa caadi xilligan oo kale. Hase yeeshee, qiimahan qordhay waxa loo aananayaa hoos u dhaca ku yimi badarka suuqyada imanaya oo ay sababtay hoos u dhaca ku yimi wax-soo-saarkii dalagyada Deyr 2009/2010 ee gobolada qaarkood (Shabeelooyinka, Hiiraan, Gedo), joojinta qaybinta dhuuni kaalmada ah ee koonfurta iyo jaha wareerka iyo hagadka ku yimi ganacsiga taas oo ay sababtay colaadda ka jirta koonfurta iyo badhtamaha dalka. Dhinaca kale, qiimaha badarka dalka wax yar ayuu hoos u dhacay ama isbedel ma sameyn inta badan suuqyada gobolada waqooyi ee Soomaaliya.


Qiimaha ugu hooseeya ee gallayda bishii 5aad waxa laga xusay Juubada Hoose (Jamaame – 5,973SoSh/kilo; Kismaayo – 7,000SoSh/kilo) iyo Shabeelaha Hoose (Qoryooley – 7,344SoSh/kilo). Dhinaca kale marka laga eego, qiimaha ugu sareeya ee gallayda waxa laga diiwaan geliyay Afmadow iyo Xagar (14,000SoSh/kilo) ee gobolka Juuba Hoose taas oo ay sababtay foogaansha ay ka fog yihiin dhul beereedka iyo roobabka iyo colladda oo hagad galiyey ganacsiga. Qiimaha ugu hooseeya ee masagada  ee bishii 5aad waxa lagu sheegay suuqa Baydhabo (4,475SoSh/kilo) taas oo sababtay keyd masago oo gobolka yaal iyo masago badan oo suuq la keenay si tacabka xilliga Gu'ga loogu hawl galo sida dhul diyaarinta iyo hawl beereedka kale. Bishii 5aad gobolada Gedo (Luuq – 10,000SoSh/kiilo, Baardheere – 7,500SoSh/kilo), Bakool (Xudur – 7,000SoSh/kiilo) iyo Hiiran (Beletweyne – 7,000SoSh/kilo) waxay muujinayaan qiimaha masagada ee ugu sareeya deegaanada laga tacab msagada, sababta oo wax-soo-saarka beeraha oo aad u hooseeyey dhawr xilli oo is xigay iyo  laga yaabee in dhuuni qaybinta la joojiyey saameyn ku yeelatay. Hase yeeshee marka la eego gobolada dalka, qiimaha ugu sareeya masagada waxa laga diiwqaan geliyey Waqooyiga (Ceerigaabo – 20,400SoSh/kilo, Laascaanood – 20,250SoSh/kilo), Bariga (Boosaaso – 17,000SoSh/kilo), iyo Badhtamaha dalka (Dhuusamareeb – 17,000SoSh/kilo) sababta oo ah nooliga oo sareeya iyo colaada ka jirta badhtamaha oo saameyn ku yeelatay ganacsiga. Qiimaha masagad ee gobolada waqooyiga iyo barigu waa u dhawyihii kuwa bariiska oo dhaqan ahaan laga cuno goboladan.

Gu'gan wanaagsan awgeed, fursadaha shaqo ee beeraha ayaa hagaagay iyo weliba shaqooyin lacag lagu bixinayo oo ka hirgaley gobolka Shabeelaha Hoose horaantii sannadkan (dayactirka kaliyada ee Qoryooley iyo Kurtunwaarey), korodhka heerka tacab goosiga ee Shabeelooyinka iyo qaybo ka mid ah gobolada koonfur galbeed (Baay, Gedo, Bakool). Natiijo ahaan, inta badan suuqyad la xigto ee Shabeelaha Hoose, awood iibsiga (galley lagu bedelenayo shaqo)waxa uu kordhay 20-30% lag soo bilaabo bishii 12aad ee 2009 (50,000SoSh/maalintiiba bishii 12aad 2009 illaa 90,000SoSh/maalintiiba bishii 5aad 2010). Awood iibsiga (badar iyo shaqo isku bedelesho) waxa kale oo uu ka kordhay lixdii bilood ee u dambeeyey ee Baydhabo (44%) iyo Beletweyne (31%), laakiin waxa uu awood iibsigu hoos uga dhacay suuqyada kale ee Shabeelooyinka (marka – 50% iyo Jawhar -14%) iyo Gedo (Baardheere – 36%) oo ay sababtay qiima korodhka badarka iyo hoos u dhaca maalin goosiga fursad helidda shaqada diisha bulshada wabiga ee ay saameeyeen fatahaaddu awgee (Jaantuska 5)_


**Jaantuska 3: Taxanaha Qiimaha Masagada ee Deegaanka Masagada laga Tacbo**




**Jaantuska 4: Taxanaha Qiimaha Galleyda  ee Gobolada Shabeelooyinka iyo Juubooyinka**




**Jaantuska 5: Taxanaha Isweydaarsiga Ganacsiga, Badar ku Bedelesho Dakhli Shaqo Maalmeed ee Heer Gobol**




Fursada shaqada oo hagaagtay, markaan aragno hoowlaha beeraha xoogooda xiligaan Gu,ga iyo sida oo kale dhaqdhaqaaqa ku shaqaynta lacagta shabellada hoose ee laga fuliyay lixdii bilood ee sanadka ugu horeeysay sanadka 2010 ( hagaajinta kanaalada Qoryooley iyo Kurtun waarey iyo shabellada hoose ). Waxay kordhisay heerka mushaarka shaqda goballada shabelle qaybo ka mid ah dhulka masagada ka soo baxdo. Taas waxay keeyntay, suuqyada muhiimka ah ee shabelleda hoose,in ganacsi isweedaarsiga ( ToT) u dhaxeeya galayda iyo mishaarka shaqo malin waxuu kordhay 20-30% laga soo bilaawo Diseembar sanadkii hore sababt oo ah iyada oo ay korodhy (ilaa laga soo bilaabo 50,000 SoSh/ malintii May. 10) ee heerka mushaarka shaqda isla waqtigaas  ganacsi isweedaarsiga u dhaxeeyo badarka iyo shaqada maalinta waa kooror tay Baydho (44%) iyo Baladweyne (31%) lixdii bilood o u danbeysay, laakin hoos bey u dhacday suuqyada kale ee shabelle (marka-50% iyo jowhar-14%) iyo dhulka masagada ka soo baxdo ( Baardheere-36%), ayna ugu wacan tahay qiimaha badarka oo kordhay. Hoos u dhaca badeeco is weydaarsiga (18-46%) ayaa laga ogaaday inta badan suuqyada waa weyn ee gobolada jubbooyinka ayada oo ay keentay qiimaha badarka oo kacay iyo qiimaha mushaarka oo hooseeya ayna keeyntay fursada shaqada beeraha oo hoos u dhacday dhulka wabiga ku fatahay ( Jantuska 5).

Awood iibsiga ugu sareeya ee gobolada Shabeelooyinka waxa laga diiwaan geliyey degmooyinka Wanla Weyn (22kiilo galley ah/maalin shaqo) iyo Qoryooley (12kiilo oo galley ah/maalin shaqo), halka Jawhar (6kiilo galley ah/maalin shaqo) ay I noo iftiiminayso awood iibsiga ugu hooseeya Shabeelooyinka sababta oo ah aad u korodhka qiimaha galleyda (41%) lixdii bilood ee ugu dambeysay. Gobolada Juubooyinka, awood iibsiga ugu sareysa waxa laga qoray Kismaayo (20kiilo galley ah/maalin shaqo) iyo Jamaame (18kiilo galley ah/maalin shaqo), halka ta ugu hooseysa laga diiwaan galiyey degmooyinka Xagar iyo Afmadow (5-6kiilo galley ah/maalin shaqo). Deegaanada laga tacbo masagada, awood iibsiga ugu sareeya waxa laga diiwaan geliyey Baydhabo iyo Beletweyne (15kiilo masago ah/maalin shaqo), halka ka ugu hooseeyana lagu xusay suuqa Xudur (5kiilo masago ah/maalin shaqo) taas oo ay sababtay qiima korodhka aadka ah ee masagada iyo hoos u dhaca ku yimi maalin goosiga. Marka deegaan ahaan la isku celceliyo la iskuna dhafo, awood iibsiga badar lagu bedelenayo xoogga shaqaalaha ee bisha 5aad waxa ugu hooseeya ta gobolada waqooyi Bari (7 kiilo masago ah/maali shaqo)

## XOOLAHA

***Xaalada Biyaha iyo Daaqa***

Dhulkii ay roobabku ku yaraayeen ee waqooyiga Soomaaliya, Marka laga reebo meelo ka mid ah dhulka Gubanka, dooxada Gabi, Deexda ee Iskushuban iyo dooxada Dharoor/Karkaar ee gobolka Bari, waxaa ka da,ay guud ahaan roobab u dhxeeya caadi iyo waxii ka sareeya oo xoogan. Roobabku waxay soo gabagabeeyeen dhibaatooyinkii ba'naa ee biyo la,aanta, qaasatan dhulka abaaruhu sida daran wax u yeeleeyeen ee Sanaag oo roob la,aantu in badan ka jirtay afartii xilli ee la soo dhaaafay. Ceelasha matooorada waa la damiyay, biyo dhaamiskiina wuu istaagay gabi ahaanba maadaama waro wadareedyadii, balliyadii, waraha goonida looleeyahay iyo Barkadihii ay dib u buuxsameen, waxaa kale oo sare u kacay heerka biyaha ee ceelalasha matoorada, ceelal gacmeedyada, durdurrada iyo wabiyada ingagan. Maadaama xaalada daaqa iyo biyuhu ay aad u xumaayeen saddex ilaa afartii xilli ee u danbeysay, roobabkii aan caadiga ahayn ee da,ay jiilaalkii la soo dhaafay kuna xigay roobabkii Guga oo fiicnaa, ayaa waxay caawiyeen in si deg-deg ah uu balka iyo daaqu u baxaan ayna hagaajiyaan heerka biyaha ku jira dhulka korkiisa iyo gudihiisaba. Waxaa taasi ka duwan, meelo ka mid ah habnololeedyada Gubanka, dooxada Gebi ee Sanaag, Deexda Iskushuban iyo dooxada Dharoor/ Karkaar ee gobolka Bari oo wali qalalan inkastoo ay heleen roobab yar oo teelteel ah mana aanay soo hagaajin ilihii biyaha iyo xaaladda daaqa.

Gobolada dhexe (Mudug iyo Galgaduud) iyo Hiiraan, dhul xooleedka muhiimka ah ee Hawd, Caduun, iyo dhulka geel dhaqatada koonfureed, iyo sidoo kale Digir-beeratada bartamaha, ayaa ugu dambayntii ka baxay abaartii raagtay ee soo jirtay ilaa Deyrtii 2007/08. Roobaabkii Guga oo u dhaxeyay caadi iyo fiicnaan una horeyeen roobab aan caadi ahayn oo fiicnaa oo da'ay xiligii Jilaalka ayaa si fiican u hagaajiyay daaqii buuxiyayna barkadahii, warahii iyo balliyadii. Biyo dhaamiskii waa ay ka joogsadeen Howdka iyo habnolaleedka Caduunka intiisa badan qiimaha biyahana hoos ayuu u dhacay inta badan dhul xooleedka gobalada Bartamaha iyo Hiiraan , maadaama biyo roobeed bilaash ah laga helayo dooxooyinka intooda badan, berkadaha, balliyada iyo waro wadareedyada. Inkastoo, Deexda iyo qaybo ka mid ah Digir-beeratada bartamaha iyo Hiiraan ay heleeen roobab aan badnayn, ay sababeen in xaaladda daaqa iyo biyah sii xumaadaan.

Koonfurta Soomaaliya, roobabku waxay ahaayeen kuwo u dhaxeeya caadi iyo fiicnaan marka la eego baaxadda iyo xoogga, waxaase taa ka duwan meelo ka mid ah Tayeeglow iyo Deexda gobollada Shabelle iyo Jubba, oo helay roobab teelteel ah oo liita, sababtayna in helitaanka daaqa iyo biyuhu yaraadaan. Waxaase taa ka duwana, koonfurta inteeda badan, roobabkii waxay buuxiyeen ilihii biyaha waxayna hagaajiyeen xaaladdii daaqsinka.

***Geediga xoolaha***

Maadaama Soomaaliya ay heleen roobab u dhaxeeya caadi iyo fiicnaan, geediga xoolaha wuxuu markii ugu horreysay tan iyo intii Deyrtii 2006/07 ku soo laabtay caadigii. Xoolihii ka hayaamay gobollada dhexe iyo waqooyiga, ayaa intoodii badnayd kusoo laabtay deegaannadoodii oo helay roobab caadi ah gugan. Haddii aynu magacawno, xoolo dhaqatada Oogada Sool ee gobolka Sanaag ee u hayaamay goboolada Bari iyo Sool saddex ilaa afar xili ka hor, waxay ku noqdeen dhulkoodii oo ay ka heleen daaq iyo biyo fiican. Taa waxaa la mid ah xoolaleyda Hawd iyo Caduun ee Bartamaha oo kasoo noqday hayaankii ay ugu maqnaayeen gobolka Soomaalida ee Itoobiaya tan iyo intii Gugii 2008da. Xoolaha jooga meelaha ay roobka ku yaraayeen ee Deexda, iyo dooxada Dharoor/Karkaar ee dagmada Iskushuban iyo habnololeedka Guban ee gobolka Sanaag ayaa u guuray habnololeedyada Oogada Sool ee gobollada Bari iyo Sanaag, si ay ugu faa'iidaystaan khayraadka daaqsineed ee isasoo taray ee goballadaasi.

xoolaha

***Xaaladda Muqaalka Xoolaha iyo Waxsoosaarkooda***

Ariga jooga dhulka Bartamaha (gobollada Mudug, Galguduud iyo Hiraan) iyo waqooyiga (Sanaag, Sool, Togdheer iyo Bariga sare), ayaa billabay kasoo kabashada waxyeeladii abaarahii is daba joogay iyo roob xumowgii, waxaana hatan soo wanaagsanaaday jirkoodii. Balse waxaa taa ka duwan, geela oo isagu kasoo kabasho ku jira. Xaaladda jirka xoolaha ee goballada Awdal, waqooyi galbeed Bari iyo Nugaal ayaa si wax ku ool ah usoo kabtay ka dib markii ay heleen roobab caadi ah labadii xilli ee u dambaysay, waxaa kaloo kabay roobabkii aan xilli roobaadka ahayn ee la helay ee xilligii Jilaalka. Soo kabashada Ariga ee gobalada bartamaha iyo Hiraan ayaa sababay in si aad ah u kordhaan rimaygooda caanahana ay in yar kordhaan. Ku soo laabashada geelii ka hayaamay (ilaa Gu 2008) goballada Bartamaha iyo Hiraan, ayaa iyan wax yar kusoo kordhiyay helitaanka caanaha ee suuqyada. Dhalmada ariga ayaa si wax ku ool ah looga dareemay gobollada waqooyi iyo bartamaha waxaana la rajaynayaa in ay sii kordhaan bilaha 6aad iyo 7aad, una horseedi doonta helitaanka caanaha riyaha ee cabitaanka qoyska iyo waliba iibintooda. Balse waxaa taa ka duwan, wax soo saar yarida caanaha geela oon iska beddelin gobalka bartamaha ee sanaddihii abaaraha, sbabtuna tahay dhalmadoo yarayd Deyrtii 2009/2010 iyo rimayga Gu'ga 2010 oo kordhay.

Xalada jirka ee xoolaha wey soo hagaagtay koonfurta, sabaabtuna ay ahayd sida wax ku oolka ah ee uu u kordhay helidda daaqsinka iyo biyaha ka dib markuu is kabay waxtarkii roobabkii aan caadiga ahayn ee bishii 3aad iyo roobabkii fiicnaa ee bilihii 4aad iyo 5aad. Waxaa taa ka duwan, lo'da joogta dhulka roobku ku yaraayeen ee Tiyeeglow (Bakool) oo aad u weydsan walina aan kasoo kabsan Derytii xumayd 2009/2010 iyo wixii kasoo gaaray Jilaalkii adkaa. Guud ahaan, koonfurta Soomaaliya rimayga lo,da iyo Geela wuxuu ahaa dhexdhexaad wax soo saarka caanahoodana si wax ku ool ah ayuu u kordhay. Dhalmada geela aad bay u hooseysaa madaama xilligii deyrtii 2009/2010 ay dhalmadooda dhexdhexaad ahayd, meesha dhalmo aad u badan oo l'oda ah la filayo Xagaagan. In kastoo caanaha suuqa yaala ay aad u liitaan, maadaama reer miyigii aanay ku soo laaban agagaarka magalooyinka waaweyn, halkasoo sida caadada ah ay ka iibshaan.

***Ganacsiga Xoolaha, Sicirka iyo Wax isku-baddalashada***


Guud ahaan dhoofinta xoolaha si wax ku ool ah ayay sare ugu kacday tan iyo bishii 12aad 2009, balse way ka hooseeysaa marka loo eego xilliga dhoofku u sarreeyo ee Ramdaanta (bilaha 7aad iyo 8aad) iyo Xajka (bisha 11aad). Bishii 5aad 2010, xoolaha laga dhoofiyay dakeda Bososo (59,662 neef ) waxayna 30% ay kasareeysaa bishii 12aad 2009 , balse 32% ayay ka hooysaa marka la barbar dhigao bishii 12aad ee sanadkii lasoo dhaafay. Tirada guud ee xoolaha laga dhoofiyay dekada Barbara (60,620 neef ) waxay toban jibaar ka badan tahay tiradii bishii 12aad 2009 (5,983 neef) waxay kaloo kasaraysa 57% bishii 5aad 2009 (38,625 neef). Kororka dhoofka xoolaha nool waxaa sababay

daaqa iyo biyaha hagaagay ee wadankoo dhan, keentayna in ay kororto tirada xoolaha leh tayada dhoofka, iyo waliba hagaagga helitaanka suuqyada dhoofka ka dibmarkii uu Sacuudiga uu ka qaaday xayiraadda doofka xoolaha bishii lasoo dhaafay ee 10aad 2009. Waxayse galabsatay, in dhoofintii hilibka uu gabi ahaanba istaago ka dib markii uu kordhay dhoofinta xoolaha nool.


Sicirka xoolaha ee bishii 5aad 2010 ayaa weli taagan heerarkii ugu sarreeyay ee shantii sano ee ugu dambaysay inta badan suuqyada waddankoo dhami (Jantuska 6). Hadda, sicirka rida dabaaxa ah ee gobollada Masago tabcatada, Shabeelle iyo Jubbooyinka ayaa 26%,2% iyo 12% ka sarreeya marka la barbar dhigo bishii 12aad 2009, waa siday isgu xigaane. Gobalada waqooyi galbeed iyo Bartamaha, sicirka riyahooda wuxuu 64% iyo 5% ka sarreeyaa bishii 12aad 2009, sababtuna tahay gugan oo ay xooluhu naaxeen. Gobalada waqooyi bari, sicirka riyaha dabaaxa ah ayaa xoogaa yar hoos u dhacay (2%) laga soo billabo bishii 12aad 2009, sababtuna tahay xoolo badan oo xoolo dhaqatadii kusoo guurtay xilligii deyrta 2009/2010, oo iminka iibinaya xoolohoodii si ay isaga bixiyaan deymihii ay galeen xilligii Jilaalka ee lasoo dhaafay.

Lixdii bilood ee ugu danbeeysay, celceliska isku-baddalashada ri'da iyo firida waa ay koroortay deegaannada Masaggo tabcatada 21%), Waqooyi-galbeed (48%) iyo Bartamaha (5%). Waxaa taasi ka duwan, hoos dhaca ku yimid isku-badalashada gobollada Shabelle (28%), Juba (19%) iyo Waqooyi-bari (12%) oo isla waqtigaa ah madaama uu si wax ku ool ah uu sicirka firida uu sare u kacay. Marka la barbar dhigo celceliska 5-sano (6aad 2005 – 5aad 2010) isku-baddalashada way hooseysay bishii lasoo dhaafay Bartamaha (Bariis), Juba (Galley) iyo masaggo tabcatada (Masaggo), meesha aanay wax iska baddelin Shabeelle ama ay kordheen gobollada waqooyi (Jantuska 7 iyo 8). Marka la barbar dhigo isku-baddalashada rida dabaaxa iyo firida dalka (Galley iyo masaggo), isku-baddalashada ugu sarrreysa waxaa laga soo qoray suuqa Baydhaba (167kg masaggo/neefkii) ee gobolka Bay – oo ah gobolka waxsoosaarka masaggada ugu badan ee Soomaaliya). Marka aagaag loo eego, isku-baddalashada ugu sarreysa (129kg galley/neefkii) waxaa laga soo qoray dooxada Shabeelle, meesha Waqooyi-bari uu muujiyay isku-baddalashada ugu hooseysa (68kg masaggo/neefkii), sababtuna tahay kharashka dheeriga ee gaadiidka uu ku kordhinayo masaggada ee ka imanaya gobollada koonfureed ee Soomaaliya ee iyagu tabcada.


**Jaantuska 6: Taxanaha Qiimaha Rida Daabaxa ah**




Jaantuska 7: Taxanaha Isweydaarsiga Ganacsiga, Badar ku Bedelesho Dakhli Qiimo Ri ee Gobolada Koonfurta




**Jaantuska 8: Taxanaha Isweydaarsiga Ganacsiga, Badar ku Bedelesho Dakhli Qiimo Ri ee Gobolada Badhtamaha iyo Waqooyiga**




## SUUQA IYO GANACSIGA

### *Sarifka lacagaha*

Laga soo bilaabo bishii 12aad 2009, shilinka soomaaliga ah isma aanu baddelin ama wax yarbuu qiimi jab ku dhacay suuqyada Bartamaha, Waqooyi -bari iyo Koonfurta. Haddi aynu soo qaadanno, Muqdisho suuqeed weyn ee Bakaraha, halkii Doolar oo Mareykanka ah waxaa lagu baddalanayay 31,800Sh.So bishii 5aad 2010, oo muujinaya qiyaas yaroo oo qiimi jab ah (hoos u dhac 31,550SoSh/USD) laga soo billaabo bishii 12aad 2009. Isbeddel la mid ah ayaa ka muuqda suuqyada kale ee isticmaala ShSo kaasoo qiimi jab 1-5% oo isla xilligaa ah. Waxaa taa ka duwan, marka loo eego bishii 3aad 2007, qiimiga ShSo ayaa wali ah kala bar qiimigiisii hore. Shillinka Soomalilaand (SlSh) aya isna qiimi jab ku dhacay mudadii u dhaxaysay bishii 12aad 2009 ilaa bishii 5aad 2010, qiyaas ah boqolkiiba 5 (min SlSh 6,400 ilaa SlSh 6,700/doolarkii). Waxaa taa ka duwan, lacagtani waxay hanatay 4% oo qiimi koror ah laga soo billaabo bishii 5aad ee sanadkii hore. Sarrifka lacagaha ee Soomaalilaand wuu degganyahay marka loo eego dalka intiisa kale, wuxuuna muujinayaa in 7% oo kaliya uu qiimi jabay marka loo xigto sanadkii (bishii 3aad 2007).

### *Sicirka Badeecada la soo Dajiyo*


Sicirka badeecdaha lasoo dajiyo (batrool, naafto, bariis, bur, sonkor, saliid cadey ) ayay kala duwanaansho ka muuqataa tan iyo bishii 12aad 2009 oo qiyaas hoos u dhac ah (1-12%) uu ku dhacay cunnada lasoo dajiyo iyo koror (1-4%) oo ku dhacay batroolka. Marka loo barbar dhigo bishii 5aad 2009, sicirka batroolka wuxuu sare u kacay 1-7%, bariiska iyo saliid caddeyda waxay hoos u dhaceen 1-9%, meesha sokorta iyo naaftada ay ka muuqato sicir koror muuqda, una dhexeeya 23-65% iyo 3-43% waa siday isugu xigaan. Sicirka kororka ugu sarreya ee naaftada waxaa lagu arkay Muqdisho (43%) meesha sokorta isbeddelkeeda sicirka lagu xusay suuqa Boosaaso (oo kordhay 65%). Waxa ugu badan ee sababy kororka sicirka sokorta iyo naaftada ayaa ka mid ah , soo dejinta oo yaraatay, kharashka gaadiidka gudaha oo sarreeyaiyo waliba sicirka saliidda cayriin ee dunida oo sarreeya tan iyo bishii 4aad 2009 (Jantuska 9 iyo 10). Bishii la soo dhafay gobollada Bartamaha iyo dooxada Jubba

waxay soo bandhigeen sicirkii ugu sarreeyay ee sokorta iyo naaftada oo u dhigma SoSh 29,170 iyo SoSh 33,800 waa siday sigu xigaane. Marka loo barbar dhigo waxii ka horeeyay heerarkii sicir bararka (bishii 3aad 2007),sicirka badeecooyinka oo dhami lagasoo billabo bishii 5aad 2010 ayaa ay 103-230% ka sarreysay dhulka lagu adeegto SoSh halka 7-70% uu ka sarreyay halak lagu adeegto SlSh.


***Qarash Nololeedka Saboolka Reer-magaalka***

Ilaa iyo sanadka biloowgisii Halbeegga Qiimaha Macmiilka (HQM) ama waxa ay ku kacayso Kharashka ugu Yar ee Nolosha ( KhYN) ayaa marka si loo eego ah mid deggan meelaha ShSo lagu adeegto balse 5% ayuu hoos u dhacay Soomaaliland. Khaasatan HQM wuxuu in yar sare u kacay Bartamaha (3%) iyo koonfurta (7%) waa sida ay isugu xigaane balse hoos ayuu u dhacay waqooyiga ku adeegta SoSh (9%) marka loo eego isla muddadan oo sanadkii hore ah. Waxaa taa ka duwan, labadii bille u dambeysay (laga soo bilaabo bishii 3aad 2010), HQM hoos ayuu u dhacay Bartamaha 8% waxaa kaloo uu hoos u sii dhacay (12%) waqooyiga ee ku adeegta SoSh meesha inta kale ee koonfurta kuna adeegata SoSh uu degganyahay (Jaantuska 11). Marka la barbar dhigay sanadka asal ahaan la xigto (bishii 3aad 2007) hadda heerarka HQM ayaa 93 – 147% ka sarreeya dhammaan deegaannada lagaga adeegto Shilinka Soomaaliga iyo 17% ka sarreeyaa deegaannada Soomaalilaand Shilin lagaga adeegto. Bishii 5aad 2010, halka qiimaha Marka loo fiirsho xiliga saldhiga u ah (March 2007) heerka tusaha qiimaha macbiilka ee hada waxuu kasareeyaa 93-147% dhulka shilin Soomaliga lagaga adeegto oo dhan waxuu kaloo ka sareeyaa 17% dhulka Soomaliland. Bishii 5aad 2010 qiimaha ugu sarreeya ee Kharashka ugu Yar ee Nolosha ( KhYN) ee deegaannada shilin Soomaliga lagaga adeegto ((3,637,283 SoSh) ayaa laga soo qoray waqooyiga, halka laga soo qoray midka ugu hooseeya (1,907,780 SoSh) koonfurta. qiimaha KhYN ee degaannada laga addegto SlSh ee waqooyiga ayaa u dhigma 879,303 SlSh.

**Jaantuska 9: Taxanaha Ascaarta la soo Dajiyo Marka la Barbar Dhigo Sarifka Lacagaha ee Gobolada Dhexe**





**Jaantuska 10: Taxanaha Ascaarta la soo Dajiyo Marka la Barbar Dhigo Sarifka Lacagaha ee Juubooyinka**




HQM ayaa isbeddelay labadii bilood u dambaysay ayaa sababi karay kala duwanaanshaha sicirka maciishadda muhiimka ah ee ku jira KhYN. Bartamaha, HQM waxaa hoos u dhigay sicirka caanaha ee hoos u dhacay (34%) iyo hoos u dhaca aan la filayn ee sicirka sokorta (3%) iyo Saliid caddayda (1%) taaso lidkeed ah sida wadajirka ah sicirka firida uu u kacay (2-3%). Is dhimista waxyeelada sicir bararka ee Waqooyi-bari ayaa caawisay in sicirka caanaha uu hoos u dhaco (21%), sokorta (16%), Masagada (13%), saliid caddayda (8%) iyo burka (3%). Degganaanshaha HQM ee Waqooyi-galbeed waxaa sababay lidka sicirka masagada oo isbedbeddalay suuqyada kala duwan, meesha koonfurta ay ugu wacan tahay deggenaanshaha sicirka masagada iyo hoos u dhaca sicirka sokorta (10%) iyo caanaha (6%) kuwaasoo dheelitiray sicirkii kacay ee burka (6%) iyo saliid caddayda (2%).

**Jaantuska 11: Taxanaha Halbeega Qiimaha Heer Gobol**



## NAFAQDA

Haayada sugnaanta cuntada iyo nafaqda oo ay la shaqeeynayaa UNICEF, WFP, MERLIN,SRCS iyo wasaarada caafimaadka puntland ayaa waxay ka qabteen baaris nafaqo oo ku salaysan hab nolaleedka gobalada bartamaha iyo waqooyi Bari oo ah Baarista nafaqda hawd iyo Caduun May 201. Sababtuna waxay tahay in dib loo fiirsho xalada nafaqo lix bilood kadib baaristii Deyrtii November 2009, taaso sheegaysaa xaalad ba'an, si ay ugu fidiyaan dadka la shaqeeya xog casriyeeysan oo looga jawaabo. Tira ilmo ah oo dhan 647 ayaa la baaray Hawd iyo 666 hab nolaleedka Caduun.

Waxii ugu horeeyay ee laga helay baaristii sahanka nafaqada ee dhulka Hawdka waxay tilmaantay heerka nafaqdarada guud (GAM) oo ah 15.3% (12.3-18.9). iyo heerka nafaqo xumada daran(SAM) oo ah 3.9% (2.2-6.8). Habka barista ee istaatistikada oo ku salaysan CDC ee xisaabinta qiyaasta waxay tilmaamtay in heerka nafaqo uu soo fiicanayo (Pr=93.6%) marka loo eego baaristii November 2009 markaas oo heerka nafaqo darada ba,an uu ahaa 19.1% (15.3-23.0), taaso isbadelku uu san aheeyn wax weyn marka la fiirsho heerka nafaqa darada aadka u ba,an (Pr=61.6%) marka loo eego 4.3% (2.7-5.9) lixbilood ka hor.Guud ahaan xalada nafaqo ee hagaagtay waxay la xariirtaa helitaanka caanaha oo ay la socoto helitaanka daaqa iyo biyaha ee roobabkii Gu,ga 2010 ( fiiri qaybta xoolaha) iyo faragalinta kaalmada bini,aadamka. Si kastaba ha aahtee, heerka dhimashada ee saldhiga ah (CMR) waa 1.07 (0.64-1.79). taaso tilmaamaysay dhibaato ilaa iyo November 2009. Dhimasho 32 ah ee la soo sheegay waxaa keenay shuban (9 badanaa Caabud waaq ) , curudada dheef mareenka (6), kaneeco (3 Baladweyne iyo Xarfo), dhiig la,aan (3) umul raaca (2).



*Miisaamidda Culayska, FSNAU, hab Nololeedka Hawd, Maajo 2010*

Degaannada hab nolaleedka Caduun,natiijada hordhaca ee sahanka waxay tilmaameysaa in heerka nafaqa darada guud ay noqotay 22.8% (19.2-27.0), halka heerka nafaqa darada liidatana ay noqotay 7.1% (4.7-10.5) taas oo muujinaysa xaalad nafaqo darro khatar ah. Marka loo eego falanqeynta tirokoobka ku salaysan ee CDCda ee xisaabinta qiyaasta waxay muujisay in aan wax weyn sidaas u sii xumaan heerka nafaqa darada guud ( pr=62.7%) marka la barbardhigo sahankii la mid a ahaa ee la qabtay November 2009 markaas oo heerka nafaqa darada guud ay ahayd 20.2% (15.6-24.7). sikastaba haaahtee, waa sii xumaaday heerka nafaqa darada liidata (pr=93.2%) marka loo eego 4.6% (2.8-6.3 ) sahankii hore. Roobabkii Gu,ga 2010 ayaa si wanaagsan uga da'ay degaannadan Cadduunka,iyadoo colaaduhuna ay xadideen socodka gaadiidka cuntada ka keena dekadda Bossaaso,taas oo raad ku yeelatay helidii cuntada. Heerka dhimashada guud (CMR) waa 0.52/10,000/ maalintii oo ah heerka digida. 17ka ee dhimashada ah ee xogtu sheegtay waxa u kala dhinteen: (6): umal raac haween ah, (5):shil/dhawaacyo dagaal la xiriira iyo shuban; (2). Falanqeynta tirokoobka ku salaysan ee CDCda ayaa muujnaysa in xaaladda nafaqadu ay tahay mid laga welwelo,aadna u xun gaar ahaan dhulka degaannnada Caddunka marka loo eego dhanka degaannada Hawdka ee heerka nafaqa darada guud (pr=99.8%) iyo midda daran(pr=92.6%). Warbixin faafaahsan ee la xiriirta natiijadan iyo waxyaabaha saldhiga u ahba waxaa lagu soo bandhigi doonaa warsidaha xogta nafaqada ee bilaha May – June ee 2010.


***Qorshaha Sahannada Nafaqada ee Bilaha June-July 2010***

Ha,yada Falanqeynta Sugnaanta cuntada iyo Nafaqada (FSNAU) waxay hadda sahanno lagu qiimeynayo xaaladda nafaqada ka wadaa barakacayaasha iyo degaannada magaalooyinka ee Hargeesa, Burco,Barbara, Bososo ,Garoowe iyo Galkacyo. Nattijada sahannadan waxaa lagu soo bandhigi doonaa warsidaha xogta nafaqada ee la soo saari doono bilaha May iyo Juun. Sahanno kale ayaa la qorsheeyey in laga sameeyo Gobollada Hiiraan,Shabelle, Jubba, Gedo, Bay iyo Bakool bilaha soo socda ee 6aad-7aad 2010, iyo weliba degaanno kale ee dhanka waqooyiga bartamaha July 2010. Dadaalo la dooonayey si uu qabsoomi lahaa sahanka nafaqada ee gobolka hirran ayaa socday muddo bill ah. Hase ahaatee, xaalado jira awgeed weli sahankii ma bilaamin, waxaase la rajeynayo in xaalddu ay isbedeli doonto, sahankuna uu qabsoomi doono. Dhinaca Afgooye, waxaa hadda ka bilaabmay tababarkii sahanka barakacayaasha Afgooye.

***Baarista Aqoonta, Dareennada iyo Dhaqammada ee Cunidda Haraaga Hilbaha Xoolaha ee Boorama, Burco iyo Boosaaso***

UNFAO/FSNAU ayaa soo gabagabaysay xog ururintii ku saabsanayd aqoonta, dareennada iyo dhaqammada ee cunidda haraaga hilibka ee laga qabtay Boorama, Burco iyo Boosaaso oo ka mid ahaa barista ADDh, waxaana socota xaraynta xogta. Barista ADDh, ayaa qabtay UNFAO *Mashruuca Waxqabadka dib u hagaajintaHabnololeedyada Reer Miyiga*[2] [1] iyadoo Bangiga Caalamku uu maalgelinayo, waa qayb ka mid ah halabuur ballaran oo ah sidii loo kordhin lahaa hilitaanka cunno nafaqo leh kooxaha nugul, khaasatan caruurta iyo dumarka ku jira da'da dhal-mada. Waxaa la ictiqaadsan yahay in wixii xog ah ee kasoo baxa xog saleed lagu darsayo sidii hore lagu mari lahaa iyo waliba loo higi lahaa fulinta mashruuca, khaasatan ka UNFAO iyo UNICEF, si ay u dejiyaan qorshe ku haboon bulshada la tiigsanayo/ama la daneynayo dhinaca hab isku qoofalan ee barashada nafaqada. Waa laga doodi doonaa ama la wadaagi doonaa hor dhaca natiijada daraasada nafaqada Biliha 5/6aad.

1. 325 wiil iyo 322 gabdhood ee hab nololeedka Haawdka; iyo 345 wiil iyo 321 gabdhood ee hab nololeedka Caduun
2. Xubin 2.2: Tayeyn guryaha wax lagu qalo oo ay weheliso adeegyo kale oo wax ku ool ah




**Qoraalada Hadda soo Baxay iyo Kuwa Soo Socda**

*Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSNAU/FEWSNET, Maajo 2010*
*Warbixinta Xogta Cimilada ee FSNAU/FEWSNET, maajo 2010*
*Taxanaha Xo Farsamo, Falaqeynta Xog-Saleed Hab Nololeedka Magaalada Gaalkacayo, Juunyo 2010 (Soo Baxaysa)*
*Warbixin Daraasadeedka Nafaqayayaalka ya Yare e FSNAU, Maajo 2010*

Technical & Managerial Support

European Commission

Funding Agencies